SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1076
KITAABKII COBADYAAH CUTUBKA 1:1-3

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxaa horey inoogu soconaya dhegaystayaal horu-dhaca kitaabkii Cobadyaah, oo aynu uga gudbi doonno cutubka kowaad ee kitaabkii Cobadyaah. Kitaabkan cobadyaah waa hal cutub, oo gebigiisana waxyi ah.

Waxaa waxyigiisa fure u ah, ama looga hadlayaa reer Edom, waxaa nebiga oo tafaasiil ka bixinaya dembiga reer Edom uu leeyahay sidatan ku qoran aayadda 3aad. Waxaana qoran sidatan:

"Kuwiinna qararka dhillaacyadooda ku hoyda oo hoygoodu meesha sare ku yaal, waxaa idin khiyaanay kibirka qalbigiinna, oo waxaad qalbiga iska tidhaahdaan, Bal yaa dhulka nagu soo ridi kara?"

SONG:REEL----CUT-----

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay bilowga horudhaca waxyiyadii Cobadyaah. Cobadyaah wuxuu ka mid ahaa afarta nebi ee aan waxba laga garanaynin taariikhdoodii hore. Saddexda kale waxay kala yihiin Xaggay, Xabakuuk iyo Malakii. Waxaannu markaa caaway horey idiinku sii wadaynaa horu-dhaca kitaabka, waxaanan isla eegaynaa:

TAARIIKHDA LA QORAY WAXYIYADAN NEBI COBADYAAH.

Tan ugu dhibka badan marka la eego waxyiyadan uu qoran nebi Cobadyaah ayaa waxay tahay inaan la helaynin wakhti loo malaynayo in la qoray waxyiga marka la eego taariikhda Israa'iil. Waxaase jira dad ku qiyaasa taariikhda ilaa iyo 887 ka hor dhalashadii Masiixa. Waxaana loo malaynayaa in waxyiyada la qoray wakhtigii ninkii la oran jiray Yehoraam iyo Cataaliyaah ay ka talinayeen dhulka reer Yahuudah sida ku qoran kitaabkii labaad ee boqorrada 8:16-26.

Mufasirka la yiraahdo Ditoor Pussey ayaa isna ku taariikhaynaya in kitaabkan la qoray ugu dhowaan markii Yehooshaafaat uu xukumayey dhulka Israa'iil sida ku qoran kitaabkii labaad ee taariikhaha 17:7. Ninka kale ee mufasirka ah oo isna la yiraahdo Canon Farrar ayaa isna ku taariikhaynaya kitaabka ugu dhowaan 587 ka hor dhalashadii Masiixa.

Waxaana ku raacay mufasirka kale ee la yiraahdo Moorhead oo isagu la noolaa Yeremyaah. Waxaana labadaas khabiir ay ku xirayaan caddayntooda aayadda 11aad ee kitaabkan halka cutub ka kooban, waxaana haddii aynu idiin akhrinno la soo kala baxaysaan baalka 1151 ee Axdigii Hore 1:11. Waxaana

qorniinku leeyahay sidatan:

"Waayo, wakhtigii aad ag taagnaydeen oo iska fiirinayseen, markay shisheeyayaashu maalkooda qaadanayeen, oo dadka qalaad irdahooda soo gelayeen, oo ay Yeruusaalem saamiga u ridanayeen, xataa idinku iyagoo kalaad ahaydeen."

Waxaa markaa haddaba la oran karaa qidcadaas kore waa waxyi ama waa taariikh la qoray markii waxaasu dhaceen dabadeed. Marka si caadi ah loo macneeyo ayey, dabcan, u muuqanaysaa, inaad u aqbasho sida taariikh o kale, oo maahan waxyi. Waxaana taasu ay ka dhigaysaa in taariikhdii Cobadyaah noolaa ee uu waxyigan gaaban qoray ay ugu dhowaan ahayd 587 sannadood kaddib markii dadkii loo kaxaystay Baabuloon.

Waxaanay ku beegan tahay wakhtigii Yeremyaah. Waxaase fure u ah ama aad iyo aad loogu adkaynayaa waxyigan Cobadyaah boqortooyada reer Edom. Haddii haddaba aad eegto aayadda 6aad ee cutubkan kowaad, baalka 1151 ee Axdigii Hore, ayaa waxaa qorniinku leeyahay sidatan:

"Sidee baa loo dhacay alaabtii reer Ceesaw! Oo khasnadihiisii qarsoonaa sidee baa loo baadhay!"

Waxaannu barnaamijyo kuwan ka horreeyey idiinku soo sheegnay magaalada Edom ay ahayd halka dadku ay lacagta dhigtaan xilliyadii hore, oo waxay la mid ahayd sida Swiss Bank. Haddaan markaas intaas uga baxno barnaamijka ayaannu imminka si dawaali ah idiinku bilaabaynaa dhegaystayaal:

CUTUBKA KOWAAD EE KITAABKII
NEBI COBADYAAH.

Waxaannu horey idiinku soo sheegnay in kitaabkan

Cobadyaah uu ka kooban yahay oo qura hal cutub. Waa kitaabka ugu gaaban haddaba marka la eego kutubta Axdigii Hore. Wuxuuna ka kooban yahay isaga oo dhan 21 aayadood. Sababtaas aawadeed dad badan bay la tahay in kitaabkan aan sinaba loogu baahnayn in la akhristo ama daraasaad lagu sameeyo.

Waxay kaloo la tahay haddii ay ka boodaan, inaanay dareemaynin oo aan la seegaynin waxbarid ama murti weyn oo kitaabkaas ku qoran. Haddaba, geesinnimada waxyiga loo sheegayo ayaan macna-tiraynin farriintan waxyiga ah. Isla sida nebiyada aan sida weyn loo garanaynin, ayaa farriinta nebiga ay leedahay sal, oo waa mid ficil ah oo ku habboon ama waafaqsan yoolkeeda ama wixii looga gol lahaa. Waa farriin khusaysa wakhtigan aynu innagu nool nahay. Waxaase aynu soo qaadanaynaa marka hore maaddada ku taxluuqda:

FARRIIN KU SOCOTA REER EDOM OO LA SII SHEEGAY

Haddaba, ma jiro nin ka mid ah nebiyada lagu sheego inayan magac weyn lahayn oo aan dadka u soo jeedin farriin xoog leh. Niman qabow oo baraf ah maahan, waase niman hadallo kulul oo xagga Rabbiga ka yimid dadka ku wacdiya. Waxyigii Cobadyaah wuxuu khuseeyaa ciqaabta dul imanaysa boqortooyadii yarayd ee reer Edom.Waxaanan imminkana idiin akhriyeynaa ama aynu soo gaarayn:

XUKUNKII LA SAARAY REER EDOM

Haddaan meeriska waxyiyada nebiga idiin bilowno ayaannu la soo kala baxaynaa baalka 1150 ee Axdigii Hore 1:1. Waxaana qoran sidatan:

"Kuwanu waa wixii la tusay Cobadyaah. Sayidka Rabbiga ahu sidan buu dalka Edom ka leeyahay: "Annagu Rabbiga xaggiisa ayaannu war ka maqalnay, oo fariin wade ayaa quruumaha dhexdooda loo soo diray, isagoo leh, War kaca, oo kaalaya aan dadka Edom dagaal ugu kacnee."

Haddaba Cobadyaah si toos ah oo aan qarsoodi ahayn ayuu inoogu sheegayaa in waxyigan uu ka helay Rabbiga. Yuu yahay Cobadyaah? Cobadyaah, sidaaan idiinku soo sheegay horudhaca waxyigan uu qoray, wuxuu ka mid ayahay nebiyada aan sida weyn loo garanaynin, oo welibana isaga ninna waxba kama yaqaanno.

Magaciisu wuxuu ahaa magac dadka reer inu Israa'iil caan ka ah, wuxuuna magacaasu ka macne yahay Addoonka Rabbiga, ama **"Qaadunkii Yahweh."** Wuxuuna imminka leeyahay Cobadyaah: **"Sayidka Rabbiga ahu sidan buu dalka Edom ka leeyahay."** Edom ayaa kitaabkan gaaban ee waxyiga ah fure u ah. Waxaannu ku soo barannay kitaabkii kowaad ee uu qoray Muuse, oo loo yaqaanno Bilowgii, in Edom ay ka soo farcameen Ceesaw, oo ahaa mataankii Yacquub ama Israa'iil. Waxaana qorniinku leeyahay sida ku qoran aayadda 1aad ee cutubka 36aad, markaasoo qorniinku uu leeyahay, "**Haddaba kuwanuna waa farcankii Ceesaw, isba waa Edom."** Aayadaha 8-9 ee isla cutubkan 36aad ayaa tafaasiil dheeraad ah laynagu siinayaa oo waxaa qorniinku leeyahay: **"Ceesawna wuxuu degay Buur Seciir; Ceesaw waa Edo. Kuwanuna waa farcankii Ceesaw oo ahaa reer Edom aabbahood oo degganaan jiray Buur Seciir."** Haddaba kaasu waa qorniinkii laga qoray reer Ceesaw, oo saddex kol baa lagu soo

noqnoqonayaa inta aynu ku jirno kitaabkan.
Inkastoo anigu aan hubo in Muuse aanu garanaynin, haddana Ilaah Ruuxa Ilaah ayaa ku adkeeyey inuu qorniinka dhigo iyo in Ceesaw dhalay reer Edom. Reer Edom waa faracii ka soo farcamay Ceesaw, isla sida reer binu Israa'iillba ay uga soo farcameen Yacquub. Waxaannu garanaynaa in Ceesaw ahaa mataankii Yacquub.
Waxaannu garanaynaa inuu ahaa wiilkii nebi Isxaaq iyo Rebeeqah. Inkastoo ay isku mar dhasheen, haddana ma ayan ahayn wiilal dhinac waliba isaga mid ah. Waxaa mtaanaha lagu yaqaannaa inay dhinacyo badan isaga ekaadaan, laakiin labadan wiil dhinacyo badan bay ku kala duwanaayeen. Ceesaw wuxuu ahaa nin urgaarsade ah oo xoog weyn.
Waxaa kaloo oogadiisu ahayd timo ama xaad miiran. Laakiinse Yacquub xaadna ma lahayn, ugaarsadena ma ahayn, oo weliba ma ahayn nin jidhka daba-gala sida Ceesaw oo kale. Waxaa qisada kala duwanaanshaha labada wiil laynoogu sheegayaa qorniinka isla markii ay Rebeeqah uuraysatay oo caloosha ay ku jireen. Waxaanan la soo kala baxaynaa kitaabka Bilowgii 25:22-23, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:
"Carruurtiina uurkeeday isku dhex riixriixeen; markaasay tidhi, Hadday saas tahay, maxaan sidan u ahay? Kolkaasay u tagtay inay Rabbiga wax weyddiisato. Rabbiguna wuxuu ku yidhi iyada, Laba quruumood baa maxalkaaga ku jirta, Oo laba dad oo kala duwan ayaa uurkaaga ka soo bixi doona; Oo labada dad midkood baa ka xoog badnaan doona dadka kale; Kan weynuna wuxuu u adeegi doonaa kan yar."

Bilowgii horeba labadan dhallinyaro waxay ku dagaallamayeen uurkii hooyadood. Inkastoo ay ahaayeen laba wiil oo mataano ah, haddana isku mid ma ayan ahayn marka la eego dhinacyo badan oo noloshooda ah. Ceesaw wuxuu ahaa nin dibad joog ah ama sida Soomaalida qaar ay ugu yeeri lahaayeen, **"Dayax Afar-iyo-Tobnaad ah."**

Waxaa dadka qaarkii ay ugu yeeri lahaayeen nin diric ah oo rag wax iska yiraahda. Balse Yacquub sidaas maahayn. Yacquub wuxuu ahaa wiil gurigii hooyadii jooga oo simbaatiyo weyn ka diyaarsaday hooyadiis. Weliba Yacquub, wuxuu kaloo lahaa garashada Ruuxa oo xagga waxyaalaha Rabbaaniga ahna wuu kaga horreeyey Ceesaw.

Ceesaw wuxuu ahaa nin jidhka daba gala, o aan shaqo ku lahayn waxyaalaha Ruuxa. Waxaa qorniinku inoo sheegayaa inuu iibiyey curadnimadiisa, oo isagu ma uusan garanaynin faa'iidada ay curadnimadu leedahay iyo macaaniga weyn ee ka dambeeya ama Ilaah u soo dejiyey. Wuxuuna curadnimadiisii ku iibsaday baaqulli maraq ah, oo waxaaba ka iibsaday Yacquub oo ahaa mataankiisa.

Haddaan arrinkaas isaga ah qorniinka ka eegno ayaa waxaa ku qoran kitaabka Bilowgii 25:30-34, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Markaasaa Ceesaw wuxuu Yacquub ku yidhi, Waan ku baryayaaye, i sii aan cunee fuudkaas cas, waayo, waan daalanahay. Sidaas daraaddeed magiciisii waxaa loo bixiyey Edom. Yacquubna wuxuu yidhi, Maanta iga iibi curadnimadaada. Markaasaa Ciisaw yihdi. Bal eeg, geeri baan ku dhowahay; haddaba curadnimadu maxay ii taraysaa? Markaasaa Yacquub ku yidhi,

Maanta ii dhaaro, Kolkaasuu u dhaartay, curadnimadiisiina wuxuu ka iibiyey Yacquub. Yacquubna wuxuu Ceesaw siiyey kibis iyo fuud digir laga sameeyey, wuuna cunay oo cabbay, markaasuu intuu kacay, iska tegey. Sidaasuu Ceesaw u quudhsaday curadnimadiisii."

haddaba maahan in loo macnaysto in maraqa gacanta Yacquub ku jiray inay ku xirnayd nolosha Ceesaw, oo wax la cuno aan lagu arag guriga Isxaaq. Balse wuxuu jeclaystay maraqaas macaan, oo wuxuu jeclaa waxyaabo isla markaas ka farxiyey isaga, laakiinse xiiso uma uusan haynin sheey la sugayo ama curadnimo afka ah. Dhug uma lahayn inuu qaadanayo ducada reerka, oo isaga ay ka bilaabanayso.

Wuxuu curadnimadiisii siiyey Yacquub, oo wuxuu kaga baddashay baaquli maraq ah oo si wacan loo dallacay. Ninka leh dhaxalka curadnimada wuxuu la mid ahaa sida ninka wakiilka Ilaah uga ah reerkaas, oo beryihii hore waxay ahayd in curadku uu qaato wadaadnimada qoyska. Ninka curadnimada leh ayaa cahdi Ilaah la gala. Ceesawna wuxuu yiri, Curadn-imada aad sheegayso waxaa iiga wanaagsan anoo calooshayda wax u hela.

Haddaba labadaas walaalaha ah waxay masaal u yihiin rumaystayaasha maanta. Qofka rumaystaha ah wuxuu leeyahay, laba dabiicadood, labadaas dabiicadood ayaa iska hor imanaya. Rasuul Bawlos oo dabiicadahaas ka hadlaya ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran Warqaddiisii reer Galaatiya 5:17, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Waayo, damaca jidhku waa ka gees Ruuxa, Ruuxuna waa ka gees jidhka, maxaa yeelay, kuwanu waa kala gees,

si aydnaan u samayn waxyaalahaad doonaysaan."
Haddaba dabiicadihii Yacquub iyo kuwii Ceesaw, labaduba waxay ku dhan yihiin qofka masiixiga ah. Ceesaw wuxuu masaal u ahaa ama u tagnaa jidhka, Yacquubna wuxuu u taagnaa Ruuxa. Haddaba marka kitaabka kowaad ee Bilowgii oo ah kan ugu horreeya kutubta Axdigii Hore uu sidaas leeyahay, ayaa kitaabka ugu dambeeya ee kutubta Axdigii horena uu leeyahay ama faalladan ka kala bixinayaa Ceesaw iyo Yacquub.
Waxaan la soo kala baxaynaa kitaabkii Malakii, baalka 1186 ee Axdigii Hore 1:2-3. Waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:
"Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu waan idin jeclaaday, laakiinse idinku waxaad tidhaahdeen, War sidee baad noo jeclaatay? Ceesaw sow Yacquub walaalkiis ma ahayn? ayaa Rabbigu leeyahay, laakiinse Yacquub waan jeclaaday. Ceesawse waan nebcaaday, oo buurihiisiina cidla baan ka dhigay, oo dhaxalkiisiina waxaan siiyey dawacooyinka cidlada."
Isla markii aad akhriso qidcadaas ayaa waxaa dadka qaar maankooda gelaya su'aalo, oo waxay is-weyddiinayaan maxaa ilaah u nebcaaday Ceesow. Nin dhallinyaro ah oo dugsiyada kitaabka lagu barto wax ka dhigta ayaa barfasoorkii jaamacadda u yimid oo wuxuu ku yiri, waxaan aad iyo aad ula yaabaa waxa Ilaah u nebcaaday Ceesaw?
Wuxuuna raaciyey aad bay iigu adag tahay inaan maaddadaas garto. Barfasoorkii baa u jawaabay oo wuxuu ku yiri, **"War anigaba dhibaato way i haysataa, laakiin dhibaatadaada tayda way ka duwan tahay.**

Isagoo hadalkiisa sii wata ayaa barfasoorku wuxuu ninkii dhallinyarada ahaa ku yiri, "Waan garanayaa asbaabta Ilaah ku nebcaaday Ceesaw, laakiin weli ma aanan garan waxa Ilaah u jeclaaday Yacquub."
Haddaba ahmiyadda kitaabkan gaban ee waxyiga ah ee uu qoray Cobadyaah uu leeyahay waxay noqonaysaa in faallo laynagu siinayo waxa Ilaah u nebcaaday Ceesaw. Rag badan oo mufasiriin ah ayaa la yaabay sida nebi Cobadyaah u so saaray khaladaadkii ay gelayeen reer Edom oo keenay in Ilaah iyaga nebcaado. Cobadyaah wuxuu Doorbiin saarayaa reer Edom oo ah kuwii ka soo farcamay reer Edom.
Isla sida baniikolaha looga soo saaray sawir weyn ayaa Cobadyaah weynaynayaa sawirkii Ceesaw iyo figraddii laga haystay. Wuxuuna tafaasiil dheeraad ah ka bixinayaa wixii keenay in Ilaah ku yiraahdo reer Edom, **"Waan idin nebcaaday."** Balse Ilaah markii ay yaraayeen, ama ayan fara yeelan, kuma uusan oran, **"Waan idin necebahay."** Wuxuu iyaga ku yiri, **"Waan idin necebahay'**, kaddib markii ay qaran noqdeen.
Waa markii la arkay kuwa badan oo ka soo farcamay Ceesaw, o isagu ahaa nin jidhka raaca. Welibana nacaybka reer Ceesaw waa la qariyey ilaa laga soo gaaro kitaabkan Malakii oo ah kutubka ugu dambeeya ee Axdigii Hore, oo iyagu ka kooban 39 kitaab. Haddaba markaas iyada ah labadii wiilba waxay noqdeen qaran, hadday ahaan lahayd Edom iyo weliba israa'iil.
Israa'iil waxaa isticmaali jiray Ilaah qarniyo fara badan. Israa'iil waxaa laga dhex helay ama ka soo baxay rag uu ka mid yaay Muuse, Yashuuca, Samuu'eel, Daa'uud Xisqiyaah, Hexemyaah, Cesraa iyo muuminiin

aan farayarayn. Balse qarankan ka soo farcamay Ceesaw waxay noqdeen qaran aan Ilaah lahayn. Edom wuxuu ka hor yimid Ilaah, laakiin maxaa keenay in Ilaah nebcaado Ceesaw iyo weliba qoomiyaddii ka soo farcantay?

Waxaannu jawaabta ka eegaynaa haddaba kitaabkan Cobadyaah 1:2, baalka 1151 ee Axdigii Hore, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:

"Bal eega, quruumaha dhexdooda waan idinku yareeyey, oo si weyn baa laydiin quudhsaday."

Haddaba quruuntan waxay ahayd quruun weyn, sida aynu kitaabkan ku arki doonno, waxaan kaloo arki doonnaa sida Ilaah dhulka u keeni doono. Cobadyaah ayaa wuxuu waxyi ahaan inoo siinayaa waxyigaas sida wax mustqbalka dhacaya, laakiin haatan, kuweenna nool imminka waxyigaas waa loo kaamilay. Waayo wixii nebigu sii sheegay ood han waa la wada arkay.

Haddaba muxuu yahay dembiga ugu weyn ee reer Edom ay gelayeen ee keenay in ciqaabtii Rabbigu ay ku soo degto? Waxaannu jawaabta su'aashaas ka eegaynaa kitaabkii Cobadyaah 1:3, baalka 1151 ee Axdigii Hore. Waxaana qorniinku leeyaha sidatan:

"Kuwiinna qararka dilllaacyadooda ku hoyda oo hoygoodu meesha sare ku yaal, waxaa idin khiyaanay kibirka qalbigiinna, oo waxaad qalbiga iska tidhaahdaan, Bal yaa dhulka nagu soo ridi kara?"

Waxaa dembigoodu noqday haddaba kibir iyo badrad, oo wuxuu nebigu leeyahay, iyadoo Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah uu ka dul-hadlayo: **"...waxaa idin khiyaanay kibirka qalbigiinna, oo waxaad qalbiga iska tidhaahdaan, Bal yaa dhulka nagu soo ridi kara."**

Haddaba waxaa suuragal ah in dadka qaarkii ee maqla

wacdigaygan ay ku doodaan, ama yiraahdaan, **"Ma kibir oo kelliya ayaa loo halaagay?"** Habase yeeshee waxaan idiin sheegayaa in kibirku yahay wax aad iyo aad u xun, oo Rabbigun a neceb yahay. Miyaanay sidaas kula haayn? Bal aan masaal soo qaadanno arrinkaas badradda ama kibirka ku saabsan inoo faahfaahiya. Waxaa laga yaabaa in nin ka mid ah muuminiinta aad aragti isagoo cabsan, oo khamri ka dergay, dabadeedna la ogaado inuu khamriyacab yahay. Maxaa laga yeeayaa ninkaas oo kale? Waxaad igu oran lahaydeen, ninkaas oo kale ha laga saaro kiniisadda. Anigana waan idinku raacayaa. Kaba soo qaad in nin ka mid ah wadaaddada kiniisadda lagu qabto isagoo jabsanaya khasnad dad kale ay leeyihiin. Waxaad igu oran lahaydeen, waa kuwiinna masiixyiinta ahe, ninkaasna ha laga eryo kiniisadda, aniguna waan idinku raaci lahaa!

Kaba soo qaad in nin ka mid ah jameecada uu qab iyo kibir badan yahay, haddii ninkaas oo kale aad maqashaan, waxaad isku raacaysaan sida aad u badan tihiin in ninkaas lala taliyo, laakiin ninna oran maayo ninkaas isaga ah xubnaha kiniisadda ha laga saaro. Balse haddii anigu aan idinku iraahdo dembiga xayooyada iyo kan khamri-cabbista waxaa ka sii daran ama ka sii xun, waa sida Ilaah u arko e, kan qabka. Dembiga khamri-cabbista wx badan lagama sheegin, inkastoo Ilaah nacalad dusha uga tuurayo. Waa dembigii keenay in reer binu Israa'iil, reer Baabuloon, iyo boqortooyadii Alexanderkii weynaa iyo Rooroomaba ay dhacaan. Waa dembiga qarammo waweyn dhulka keenay, oo kuwa badanna keeni doono maanta ama wakhtiyada soo socda. Ilaah hortii

dembiga ugu weyn oo ka sii weyn khamra-cabbista ama sakhradda iyo tuugannimada ayaa wuxuu noqonayaa dembiga **"Kibirka ama qabka dadka."** Abwaan Soomaaliyeed baa mar wuxuu yiri, **"Dadow kibirka waa lagu kufaa kaa ha la ogaado."**

SONG: REEL--CUT-----

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin